

## Deganaha guriga ee qaaliga ah,

Degmooyinka Ramsey iyo Washington ayaa u shaqeynaya si wada jir ah si ay u bilaabaan hab cusub oo dib loogu warshadaynayo haraaga cuntada ee guriga ka soo baxa. Barnaamijkan wuxuu ahaan doonaa mid bilaash ah oo ay heli karaan dhammaan dadka deegaanku, iyadoon loo eegin nooca guriyeynta ama shirkada qashinka qaada. Uma baahnid inaad la xidhiidho shirkada qashinka kaa qaada si aad uga qeybqaadato.

Haraaga cuntada, sida diirka miraha iyo khudaarta, qolofa ukunta iyo budada kafeega, waxay noqdaan 20% qashinka. Dib-u-warshadeynta haraaga cuntadu waxay u beddeshaa ciid halkii uu ka noqon lahaa qashin.

Laga bilaabo Abriil, waxaanu ku tijaabinaynaa barnaamijka tiro yar oo qoysas ah oo degan agagaarkaaga.

## Waxaa lagugu martiqaaday inaad ka qeybqaadato tijaabada barnaamijka!

### Maxay ka dhigan tahay in aad ku jirto tijaabada barnaamijka?

Maadaama aad tahay qof degan aagga tijaabada lagu sameynayo, waxaad haysataa fursad aad kaga qeybqaadato barnaamijka qaadista haraaga cuntada ka hor inta aan loo fidin dhammaan dadka deggan degmooyinka Ramsey iyo Washington. Jawaab celintaadu waxay noqon doontaa mid qiimo u leh horumarinta barnaamijka ka hor inta aan loo fidin dadka kale ee deegaanka.

Waxaad tahay mid ka mid ah ilaa 2,000 ee qoys ee ku jira tijaabada barnaamijka. Waxaad ku arki kartaa meelaha tijaabada lagu sameynayo khariidadda la socota baakadan.

*La socio siyaabaha aad noogu sheegi karto khibradaada!*

### Sidee ayay u shaqeysaa?

-  Ka dalbo bacahaaga bilaashka ah ee lagu ridayo haraaga cuntada **FoodScrapsPickup.com** ama wac **651-661-9393**. Bacaha waxaa laguugu soo rari doonaa bilaash.
-  Todbobaadkiiba hal mar ama marka ay bacdu buuxsanto, ka gunud xagga sare si aad u xidho bacda. Ku rid bacdaada gudaha caaga qashinka ama qashin-qubka.
-  Waad dhameysay! Qashinkaaga waxaa loo qaadi doonaa sidii caadiga ahayd, bacahana waxaa laga socii doonaa qashinka waana la burburin doonaa.

## Maanta bilow!

Ka dalbo bacahaaga bilaashka ah ee lagu ridayo haraaga cuntada **FoodScrapsPickup.com** ama wac **651-661-9393**.

Waxaad isla markaaba bilaabi kartaa ka qeybqaadashada barnaamijka adigoo isticmaalaya bacaha ku jira baakadan. Booqo boggayaga internetka ama dib-u-eeg walxaha ku jira xidhmadan si aad u hesho hage tallaabo-tallaabo ah, tallooyinka guusha iyo liiska alaabta la oggol yahay.

### Taariikhaha Kulanka Dadban ee Xog Bixinta

May 2 | 2pm ama 7pm  
May 4 | 12pm ama 7pm



*Muuqaalada la duubo ayaa laga heli karaa boggayaga internetka.*



*Sawir si aad xogtan ugu hesho Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, iyo Karen.*

**Su'aalo miyaad qabtaa?** Booqo **FoodScrapsPickup.com**, wac **651-661-9393** ama ku biir kulanka dadban ee xog bixinta ee soo socda! Fadlan isdiwaangeli ugu dambeyn Abriil 28.